

## **Dib u Haggajinta Saqafka Dugsiga Duniway oo Isku Xidheysa Waqtigii Tegay iyo Waqtiga Jooga**

Intii lagu guda jiray bandhigii ardayda ee la qabtay maalintii ka horey xuskii Halloween, ee Dugsiga Hoose Duniway maamulaha dugsiga Philip Rafferty ayaa u isticmaalay fursad uu ku xusuusinayo qof kasta in bisha Oktoobar ay tahay bisha qiimaha ugu wanaagsan taasi oo ay tahay in la “isku xidhnaado/la isku tiirsanaado.”

Ka dib wuxuu ula dhaqmay dadka faraha badnaa ee ka soo qeybgalay inay akhriyaan “Please Please the Bees,” ee uu qoray Gerald Kelley. Buuggu wuxuu ka hadlayaa sheeko laga qorey butti magaceeda la yiraa Benedict kaasi oo ay u qaadatay in maalin walba loo keeno malab iyadoo shinidu sameyso shaqo joojin. Intii sheekadu socotay, Buttigii Benedict wuxuu ogaaday inta ay le’eg hawsha gasha marka jeeg malab ah la soo saarayo. Wuxuu bilaabay inuu si dhab ah ugu mahadnaqo shinnida iyada oo uu la shaqeynayo marka ay shinnidu malabka sameynsa maadaama uu malabka aad u jecel yahay.

Maamule Rafferty ka dib markii uu dhammeeyey akhrintii wuxuu u soo koobay fariinta sheekada sidan: “Wax kasta iyo qof kastaa si uun bay iskugu xiran yihiin. Xitaa haddii aynaan waligeen dareemin , ficiadeenu waxay saameyn ku yeeshaan dadka kale, haddaba waxaan u baahan nahay inaan ka taxadirno iyada oo ay sameyneyno wixii aan dunidani kaga dhigayno meel wanaagsan.”

Dhowr daqiqdood ka dib, wuxuu isdul taagay saqafka dugsiga, isaga oo sahaminaya shaqada dib u hagaajinta/dib u soo celinta ee dhammaadka ku dhow bisha Juun. Dugsiga Duniway waxaa la dhisay sanadkii 1927 iyada oo loo dhisay qaab jaamacadeed iyo sidoo kale laga diiwaangaliyey inuu goob taariikhii ah. Magacaabista rasmiga ee taariikhiga ah waxay keentay culeys mashruucyada dib loogu soo celinayo uu qaadanayo, laakiin arrinta Duniway, waxay noqotay mid sahal sida loo hagaajinayo saqafka biyaha soo daynayey oo kaliya u baahan shaqo dhib yar laga qabanayo iyada oo aan laga fileyn in abbaalmarin lagu bixiyo.

Wajiga koowaad ee shaqada mashruucani wuxuu bilaabmay sanadkii 2021 iyada oo dib hagaajin lagu sameyeey qeybaha cusub ee saqafka dugsiga. Taasi waxay ahayd markaad eegto hawl fudud oo lagu bedelayey. Wajiga labaad, hase yeeshii, wuxuu u baahan yahay in I Magaalada Portland laga helo oggolaanshihi lagu ilaalin lahaa goobtan taariikhiga ah. Marka ay soo dhammaaday waraaqahaasi, waxaa bilaabmaya shaqadii ay farsamayaqaanadu ku bedeli lahaayeen saqafka taasi oo ah ballaado gacanta lagu sameeyey si gaar ahna ballastar shub ah. Waxa kale oo ka mid ah biro adag iyo furitaanka labo nal oo taariikhii ah hoolka dugsiga.

“Dhismayahagu wuxuu qeyb ka yahay taariikhda Portland,”sidaa waxaa yiri Rafferty. “Waxa sidoo kalena runtii aad bay u qurux badan tahay. Labadaasi waxay mudan yihiin in la ilaaliyo.”

Mathew Braun oo ah madaxa nashqadeynta mashruucu, isna waa ku raacay. “Ma arkeysid dhismayaal badan oo la mid ah dhismahani oo kale. Xitaa maanta ma dhisi kartid.”

Laakiin, iyada oo taageero laga helayo koox xirfadlayaal khabiiro ah, waxaa soo baxday in dib loo dhisi karo. Dhowr shirkadood oo ku sugar magaalada Portland ayaa waxay amaahiyeen mashruuca koox ka mid ah khabiiradooda, iyaga oo kala tashanaya wax kasta oo ku saabsan laga bilaabo midabadda badan ee saqafka,bataalada dhoobada ka sameysan ee is kor saaran sida ugu fiican ee la iskugu xidhi lahaa saddex qeybood oo qurux badan oo ka sameysan ballaado sabad ah.

Maalintii bandhiga markii ay ardaydu oggaadeen Buttidiin Benedict iyo qiimaha in la isku naxariisto, wada shaqeeynta, iyo isku xirnaanta, ballaadda ka sameysan dhoobada ee widhwidhaya waxay ka tarjumeysaa caleenta xilingga dayrta ee ku hareereysan Duniway dhinac kasta oo ka mid ah.

“Waxaa jira wax ku saabsan imaatinka dugsiga maalin kasta oo qurux badan,” sidaas waxaa yiri Rafferty. “Waan jecelnahay. Waanan ku faannaa. Run ahaantiina waxay kor u qaadaa niyadayadda.”